

KU SOO DHAWOOW XANAANADA

Nidaamka xanaanadaha ee wadanka Finland waxuu muujiyaa sida ilmaha loo korinayo iyo ciyaaro waxbarasho leh kuna qoran sharciga wadanka Finland. Sababah xanaanada loo furay waxaa waaye, anagoo caawinaad ka helnay waalidka, In ilmaha meel nadabadgalyo leh oo lagu dhiira galinaya ay helaan. Shaqaalaha xanaanada waa kuwa tabaran oo caruurta wax bari kara , oona korin kara.

Xanaanada waxay kugu soo dalici kartaa qarash, qarashkaas oo laga xisaabinaayo boqolkiiba inta qoyska soo gasha .

Qoyska waxay xaq u leeyahiin in ay isticmaalaan qof turjubaan ah markeey ka hadlayaan arimaha quseya caruurtooda.

Ilma walba waxaa lo sameynayaa qorsho wax barasho oo isku aruursan, anaga iyo waalidka.

MARKA ILMAHA LA KEENAYO XANAANADA

- Intaan la bilaabin qorshihii maalinkaas loogu tala galay xanaanada, ilmaha ku wareeji xanaanada gudaheeda. Hadii loo baahdo, waydii shaqaalaha qof turjubaan ah.

Goobta xanaanada waxay furan yihiin laga bilaabo 06.30 subaxnimo ilaa iyo 5 galabnimo.

- Balan la gal shaqaalaha inta saacadood uu ilmahaga xanaanada joogayo.

Tusaale ahaan jadwalka golaha xanaanada

6:30-8:00 subaxnimo Ciyaaro kala duwan/wax la sawiro, iwm.

8:00-9:00 subaxnimo Quraac

9:00-10:00 subaxnimo Saacada jimicsiga sida, jimicsiga aad jeceshahay/jimicsi/sheekada oo la dhageysto, iwm.

10:00-11:15 subaxnimo Banaanka lagu ciyaaro

11:15-11:30 subaxnimo Heeso/ciyaaro

11:30-subaxnimo-12:30 duhurnimo Qado

12:30-2:00 galabnimo Seexasho/sheeko dhageysasho/ciyaaro

2:00-2:30 galabnimo Cunto fudud

2:30-3:30 galabnim Ciyaaro kala duwan/farshaxan, iwm.

3:30-5:00 Banaanka ayaa lagu ciyaarayaa

(Jadwalkan waxa kaliya uu yahay waa in uu ku hago: Waxaad weydiisan kartaa jadwalka saxda ah ee maalinka shaqaalaha xanaanada)

Markaan joogno golaha xanaanada, waxaan waqti badan ku qadanaa banaanka maalin walba – Hataa haduu da’ayo roob ama cimilada ay ka hooseyso eber. Fadlan ilmaha soo sii dhar ay u xiran karaan banaanka.

LA SHAQEYNTA WAALIDKA

- Maalin walba oo la is arko: Subaxdii waalidka waxuu sheegaya waxuu ilmaha qabanayey iyo sida uu dareemayo/dareemeyso, iyo galbihiina shaqaalaha waxy waalidka u sheegayaan waxii malinka la qabtay.
- Wada hadal iyo qorshe waxbarasho oo markiiba loo diyaariyo
- Habeenka waalidka/macalimka
- Feestooyinka xanaanada

ARIMAHA MUHIIMKA AH

- U sheeg xanaanada mar walba uu ilmaha maqanyahay
- Ha keenin ilmaha xanaanada haduu xanuunsanyahay
- Shaqaalaha xanaanada waxay heystaa shariciga qoraaya in aysan sheegsheegin arimaha quseeya ilmahaaga
- Hadii ay jiraan arin quseysa xanaanada ama ilamahaga oo aad damacdo in aad ka hadasho, fadlan kala hadal arintan shaqaalaha xanaanada